



Su'aalaha iyo Jawaabaha Inta Badan La Isweydiyo ee Qoyska loogu talagalay Qaadashada Qiimeynata Gobolka Oregon oo dhan ee Meesha Fog La Joogo

Gu' kasta, ardayda Oregon oo dhan ee fasallada 3-aad – 8-aad iyo 11-aad ayaa ka qayb qaata Qiimeynata Gobolka Oregon oo dhan ee (tusaale, maadada Luqadda Ingiriisiga, Xisaabta, iyo Sayniska). Ardayda dhigata K – 12 qaarkood ayaa sidoo kale kaga qayb qaadan doona Qiimeynata Aqoonta Luqadda Ingiriisiga (ELPA) ee Oregon iyaga oo jooga meel fog 'remotely'. Intaa waxa u dheer, in Oregon siiso ardayda fasallada 3 – 12 fursad ay iyaga oo jooga meel fog kaga qayb qaataan Ra'y-i-ururinta SEED si ay u bixiyaan jawaab celin ku saabsan khibradooda waxbarasho. In kasta oo Waaxda Waxbarashada ee Oregon ay rajeynayso ardayda intooda badani ay shakhsii ahaan imtixaanka lagaga qaado dugsiyadooda, haddana degmooyinka dugsi ayaa sidoo kale ku bixin kara qiimeynata iyada oo meel fog la joogo, taasi oo macneedu yahay in ardayda u qalanta ee hab waxbaridoodu ay tahay internet-ka/onlaynka meesha la fog la joogo ay imtixaankooda ku qaadan karaan guriga ama goobta imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. Qaybtan su'aalaha badanaa la isweydiyo ah waa in ay kaa caawisaa in aad ogaato waxa aad ka filayso.

Goorma ayuu ardaygu imtixaanka gali doonaa gu'gan?



Inta badan ardayda, muddada la qaadayo imtixaanku waxay tahay 03/07/2023 ilaa 06/02/2023 iyada oo dugsiga ilmahaagu jadwal u sameyn doono taariikhaha imtixaanka muddadaasi gudaheeda.

*(Muddada imtixaan qaadashada meesha fog la joogo: ELPA ELPA 4/11/23 – 4/28/23;
OSAS ELA, Xisaabta, Sayniska, Ra'y-i ururinta SEED 4/11/23 – 6/2/23)*

Ardaygaygu ma inuu guriga ku qaato imtixaankaa?

Maya. Xaqiiqdii, nta badan ardayda Oregon oo dhan ayaa shakhsii ahaan imtixaanka looga qaadi doonaa. Xataa haddii uu ilmahaagu ka qayb qaatay waxbarashada internet-ka sanadkani, macallinka ilmahaaga iyo shaqaalaha kale ee degmada ayaa kaala shaqeyn kara jadwalka in imtixaanada lagu qabto dugsiga ama meel kale oo degmada ah. Ardayda u qalanta nooca farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ee Qiimeynata Gobolka Oregon ama Qiimeynata Beddelka ah ee Oregon ayaa shakhsii ahaan imtixaanka looga qaadi doonaa.



Haddii ardaygu imtixaanka ku qaadayo isaga oo jooga meel fog, sidee baan uga caawin karaa in uu is diyaariyo?



Kala shaqee macallinka ilmahaaga si aad u fahamto qorshaha imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.

Waxaad u baahan doontaa in aad fahanto tiknoolajiyada looga baahan yahay imtixaanka la qaadanayo iyada oo la joogo meel fog; sida kambiyuutar leh makarafoon, sameecado, webcam, iyo ku xirnaanta internet-ka. Waa laga yaabaa in ay jiraan shuruudaha software-ka oo gaar ah si dib loogu eego. *Tusaale ahaan, ardaydu ayaa u baahan doona in ay marin u helaan qiimeynata iyaga oo isticmaalaya browser sugar oo laga heli karo www.osasportal.org.*

Haddii ilmahaagu u baahan yahay taageerooyin ama qorshayaasha qiimeynata oo gaar ah oo la ansixiyay, kala shaqee macallinka si aad u hubiso in uu ilmahaagu wax ka ogado taageerooyin ama qorshayaasha la ansixiyay ka hor maalinta imtixaanka. Qorshayaasha imtixaanka qaarkood ayay dhici kartaa in loo baahdo in ilmahaaga si shakhsii ahaan imtixaanka looga qaado. Kala shaqee macallinka ilmahaaga si loo go'aansado haddii qorshahaaga imtixaanka ee ilmahaaga ay dhici karto in la iskaga baahan yahay in si shakhsii ahaan imtixaanka la iskaga qaado.

Maxaa dhacaya haddii ardaydaygu imtixaanka ku qaaadanayo guriga ama u baahan yahay caawimaad?

Xaaladaha intooda badan, macallinka ardaygaaga ayaa yeelan doona maqalka ama xiriirka fiidiyowga tooska ah ee ilmahaaga marka uu qaadanayo imtixaanka. Haddii ilmahaagu qabo su'aalo ama u baahan yahay taageerada macallinka, wuxuu sidoo kale muuqaal ahaan ‘virtually’ “kor u taagi karaa fartiisa” ama isticmaali karaa kuwada sheekaysiga internet-ka. Fadlan xaqiqiso in qofka kaliya ee arki doona ilmahaagu inuu yahay macallinkiisa. Ma jiro qof kale oo marin u yeelan doona maqalka ama xiriirka fiidiyowga oo tooska ah lamana sameyn doono wax duubis ah.



Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?



Fiiri Ilaha Qaadista Imtixaan Wadareedka Meesha Fog La Joogo ee ku yaala [website-ka Waaxda Waxbarashada Oregon ee Imtixaan Qaadista](#) wixii la xiriira dokumentiyada iyo ilaha dheeraadka ah.